

Waa maxay sababta aysan jeerta ulahayn timo

 Basilio Gimo, David Ker

 Carol Liddiment

 Abdi Muse

 2

 Soomaali SO



Maalin maalmaha ka mid ah, Bakayle ayaa socday wabiga qarkiisa.




Jeerta na waa ay joogtay, ayadoo u socoto
damaashaad iyo cunnida xoogaa caws fiican
oo cagaaran.




Jeerta ma aysan arkayn bakaylaha in uu joogo meeshaas waxayna si kama ah ayey ugu istaagtay cagti bakaylaha. Bakaylihii wuxuu bilaabay inuu ku qayliyo jeerta, "Adiga Jeer! Miyaadan arag in aad ku taagantahay cagtayda?"



Jeertii waxay raaligelisay Bakaylihi, “Waan ka xumahay, kuma aanan arkaynin, Fadlan i cafi!”
Laakiin bakaylihii ma dhageysan oo waxuu ku qeyliyay Jeertii, “Waxaad u sameysay kas!
Maalin, un waad arki doontaa, in aad guddo!”




Bakaylihii waxuu raadiyay dab, wuxuuna ku yidhi, “Orod, soo gub Jeerta marka ay banaanka uga soo baxdo biyaha si ay u cunto caws. Way igu istaagtay!” Dabka ayaa ku jawaabay, “Dhib malaha, Bakayle, saaxiibkay. Waxaan sameyn doonaa waxaad i weydiisay.”



Xoga kadib, Jeertii waxay ka cunaysay caws meel ka fog webiga marki, "bul!" Dab holac isku badalay. Dabkii waxuu bilaabay in uu gubo timihii Jeerta.



Jeertii waxay bilowday in ay ooydo oo u orado biyaha. Dhamaan timaheedi waxaa gubay dabki. Jeertii waa ay sii waday ooyinta, "Timahaygi waxa ay ku gubteen dabka! Timayhaygii dhamaan waay tageen, timahaygii qurux sanaa!"






Bakayluhu wuxuu ku faraxsanaa timaha Jeerta ee gubtay. Ilaa maantadan la joogo, cabsi dabka ay kaqabto, Jeerta marna kama fogaato biyaha.



Global Storybooks

globalstorybooks.net

Waa maxay sababta aysan jeerta ulahayn timo

 Basilio Gimo, David Ker
 Carol Liddiment
 Abdi Muse

